

Fasaxa Caafimaadka Mushaharka la Qaato ee Qoyska Ogaysiiska Qoran ee Shaqaalaha

Taariikhda:

Loo-shaqeeyaha:

Cinwaanka Boostada:

Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Fadaraalka (FEIN):

Magaca Shaqaalaha:

Taariikhda Shaqaalaynta:

Ogaysiiskan waxa loogu talagalay loo-shaqeeyayaasha haysta Beddelka Qorshaha Gaarka ah. Wuxuu sharraxayaa xuquuqda iyo masuuliyadaha uu dhigayo barnaamijka Gobolka Maine ee Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka la Qaato (PFML). Sharcigu wuxuu dhigayaa inaynu siino macluumaadkan shaqaalaha cusub 30 maalmood ee u horreeya ee shaqaalayntooda.

Qaybta Shaqaaluhu ku Daro

Shirkaddani waxay dejisay qorshe gaar ah si loo daboolo waajibaadyada Maine PFML. Sharcigu wuxuu dhigayaa in loo-shaqeeyayaashu ay ka jari karaan ilaa kala-bar boqolkiiba ah (0.5%) mushaharrada la siiyo shaqaale kasta si loogu bixiyo caymintan (ilaa wax la mid ah waxa ka yaala waxyaalaha loo jaro Sooshiyaal Sikiyuuritiga). Waxa la jaro waxa lagu muujin karaa waraaqdaada mushaharka.

Lacagaha mushaharkaaga looga jaro barnaamijka PFML waxa la bilaabi doonaa (*Taariikhda Bilaabidda Mushaharka*) (taariikhda) sicir ah (sicirka khidmadda) %

U-Qalmitaanka Fasax

Shaqaalaha u qalmaa wuxuu qaadan karaa ilaa 12 toddobaad halkii gunno sanadeed ee fasaxa mushaharka la qaado ee uu dhigayo barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka la Qaato ee Maine (PFML) si uu u daryeelo xaaladdiisa caafimaad ee daran, si uu u daryeelo xubin qoys oo ku jirta xaalad caafimaad oo daran, si uu isku baro ilme dhashay, ama sababo kale oo u qalmitaan keena. Maareeyaha qorshaha gaarka ah ee loo-shaqeeyaha ayaa go'aamin doona haddii shaqaaluhu buuxiyay shuruudaha u qalmitaanka iyadoo la raacayo siyaasadda qorshaha ee la ansixiyey.

Sababaha Fasaxa

Gunnooyinka PFML waxa la heli karaa xaaladaha soo socda.

- **Fasax Caafimaad:** Wakhtiyada xaalad caafimaad oo halis ahi ay kaa hor istaagto inaad shaqayso.
- **Fasax Waalidnimo:** Wakhti aad ku xidhmayso ilme kadib dhalashada, masuul-korineed ama masuul-hayn ka noqoshada ilme.

Ogaysiiska Qoran ee Shaqaalaha: Cayminta Qorshaha Gaarka ah

- **Fasax Qoys:** Wakhti lagu daryeelayo qof qoys ah oo qaba xaalad caafimaad oo daran.
- **Fasax Qoys Milatari:** Wakhti loogu diyaargarobayo shaqo-gelinta milatari ee xubin qoys ah.
- **Fasax Ammaan:** Wakhti lagu raadsanayo ammaan kadib xadgudub ama tacaddi.

Xuquuqdaha % Ilaalinta:

Shaqaaluhu waxay qaadan karaan gunnooyinka fasaxa mushaharka la qaato hadday buuxiyaan shuruudaha u qalmitaanka Maine PFML, xataa hadday ku cusub yihiin loo-shaqeeye gaar ah. Loo-shaqeeyayaasha waxa waajib ah inay sii wadaan cayminta caymiska caafimaadka shaqaalaha muddada fasaxa la ansixiyey, oo ay ku jiraan qaybta loo-shaqeeyuhu ku daro.

Ilaalinta shaqadu waxay khusaysaa kadib 120 maalmood oo xiriir ah oo shaqaaluhu u shaqeeyo hal loo-shaqeeye. Haddaba, loo-shaqeeyaha waxa waajib ku ah inuu shaqaalaha ku celiyo shaqo isla tiisii ah ama u dhiganta dhanka mushaharka, gunnooyinka, xaaladaha shaqada marka fasaxu dhammaado.

Sida loo Gudbisto Sheegasho PFML:

Caymintaada PFML ee (loo-shaqeeyaha) waxa bixiya (shirkadda caymiska/caymiska loo-shaqeeyuhu iskiisa u leeyahay).

Si aad u codsato wac (lambarka taleefanka) ama iimeylka (cinwaanka iimeylka) (ama booqo linkiga aadaya websaytka).

Cinwaanka (shirkadda caymiska/caymiska loo-shaqeeyuhu iskiisa u leeyahay) waa (cinwaanka)